

Sample Letter for Parents/Caregivers

Somali Version

Salaan ku socota Waalidka ama Mas'uulka ka Bacdi,

Iskuuladeenu waxay aaminsan yihiin in waxbarashada ardayda ay ku xirantahay caafimaadkooda jir ahaan iyo maskax ahaanba. Si taas loo hubiyo, loona sameeyo jawi ixtiraam ku dhisan, waxaan ka codsanay hay'adda caawisa dhalinyarada ee "Youth Frontiers" ay ardaydeena siiyaan Tababarka Waxgaradnimada ee loo yaqaan "Courage Retreat."

Laga soo bilaabo sanadkii 1987, hay'adda caawisa dhalinyarada ee "Youth Frontiers" oo ah mid madax banaan, kana dhisan Minneapolis oo aan siyaasad ku shaqo lahayn ayaa dhalinyarada siinaysay barnaamijyo kobcinaya muhiimadda uu dhaqan wanaaggu u leeyahay ardayda iyo guud ahaan bulshada. Waxay hay'adaas ku dadaashaa in dhalinyaradu bartaan sidii ay ixtiraamaan naftooda iyo tan dadka kale marka ay iskuulka joogaan. Tani waxay u sahlaysaa ardayda in ay wadankooda iyo caalamkaba ay ka dhigaan mid aad u wanaagsan. Sanadkii la soo dhaafay hay'adda caawisa dhalinyarada ee "Youth Frontiers" waxay la shaqeysay in ka badan 124,000 oo arday iyo macalimiin ah oo kala jooga dalka oo dhan.

Tababarka Waxgaradnimada ee loo yaqaan "Courage Retreat" ee hay'adda caawisa dhalinyarada waxay "Youth Frontiers" shaqaalaheedu waxay dhalinyarada baraan inay noqdaan kuwo naxariis leh oo ka hortaga cabsi gelinta lagu sameeyo ardayda kale "bullying." Tababarka noocaas ah waxay ka dhigaan iskuulada kuwo wanaagsan.

Si waxtarka ka soo baxa tababarkaas uu u noqdo mid waara, waxaan aaminsanahay in dhamaan qeybaha kala duwan ee bulshadu ka qeyb qaataan.

Sidaa daraadeed waxaan waalidiinta ku dhiirigelinaynaa inay carruurtooda kala hadlaan tababarkaas iyagoo waydiinaya su'aalahan:

1. Tababaradee iyo ciyaarahee "activities" kuugu ficnaa?
2. Horjoogayaashiinu "group leaders" see ahaayeen?
3. Maxaa ka mid ah waxyaabaha tabanaysay ee aad saaxibadaa kala hadashay?
4. Maxaa ka mid ah waxyaabaha tabanaysay ee dhibaatooyinka kuu keena?
5. Li sheeg hal wax oo aad berrito iskuulkaaga ka sameyn doontid oo muujinaya waxgaradnimadaada iyo geesinimadaada?

Fadlan booqo websaydka youthfrontiers.org/courage-retreat si aad u heshid akhbaar dheeraad ah oo ku saabsan hay'adda caawisa dhalinyarada ee "Youth Frontiers," daawona viidiyow-ga ku saabsan tababarka waxgaradnimada ee "Courage Retreat."

Nabadgelyo,

Maamule ama Macalin